# Wax-ku-kordhinta gaarka ah ee shuruudaha amaahda ee kuraasta curyaamiinta ee korontada ku shaqeeya iyo mashiinka kicinta

## Isticmaalka iyo daryeelka qalabka

- Sida ku cad Buug-gacmeedka qorista qalabka gargaarka gaarka ah waa in kursiga curyaamiinta ee korontada ku shaqeeya iyo mashiinka kicinta si joogto ah loo isticmaalo toddobaad kasta sanadka idilkiisa, marka xaaladaha waddooyinku oggolaadaan.
- Kursiga curyaamiinta ee korontada ku shaqeeya, inta jeer ee la isticmaalo waa in ay ahaataa ugu yaraan 3 jeer toddobaadkii iyo unugyada atomaatikada ah ee matoorka ahna waa in la isticmaalo ugu yaraan 2 jeer/toddobaadkii.
- Qalab-bixiyuhu ayaa mas'uul ka ah dabagalka oona dalban kara in kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya/ mashiinka kicinta la soo celiyo haddii aan loo isticmaalin si waafaqsan buug-gacmeedka qorista qalabka gargaarka ee gaarka ah, tilmaamaha isticmaalka ama tilmaamaha qalab-bixiyaha.
- Raac tilmaamaha isticmaalka ee qalabka gargaarka.
- Hubi in cadaadiska hawada ee taayarrada uu sax yahay.
- Kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya/ mashiinka kicinta nadiif ha ahaado.
- Battariyada iyo danabeeyaha:
  - Danabey battariyada, xitaa marka kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya/ mashiinka kicinta aan la isticmaalin in muddo ah, eeg tilmaamaha isticmaalka.
  - Kursiga curyaanka ah ee korontada ku shaqeeya waa danabaysmi karaa marka aan la isticmaaleynin, laakiin haddi uu dhaco onkod waa in danabeeyaha laga bixiyaa, haddii kale danabeeyaha wuxuu halis u yahay inuu dhaawacmo.
  - haddii danabeeyaha laga soo saaro godka korontada ee gidaarka laakiin uu ku sii jiro kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya, battariyadda waa ay ka baxaysaa danabaynta. Sidaa darteed, danabeeyuhu waa in laga laga saaraa gidaarka iyo kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya, marka wax danabayn ah aysan socon.
  - haddii batteriga loo baahdo in la beddelo sabab cilladeed ama sabab danabayn oo aan dhameystirmaynin, waxaa laga yaabaa inay waajib kugu noqota magdhow.
  - Danabayntu waa inay ku dhacdaa meel qalalan oo hawo leh oo ku taagnaanaysa heerkul aan hoos uga dhacaynin +5 darajo.

- Dhammaan qalabyada dheeraadka ah iyo wax-ka-bedelidda ka baxsan kuwa uu soo saaray soo-saaraha qalabka waxay saamayn karaan badbaadada ammaanka lagu qabi karo kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya/ mashiinka kicinta . Alaab ama qalab dheeraad ah lama rakibi karo iyada oo aan ogolaansho laga helin qalab-bixiyuhu iyo Xarunta Qalabka Gargaarka.

## Kaydinta

- Kaydinta waa inay ku dhacdaa meel qalalan oo hawo leh oona taagnaaneysa heerkul aan hoos uga dhicin +5 darajo.
- Kaydinta waa in u qabsoontaa si dadka aan la ogolayn aanay u helin kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya/ mashiinka kicinta ama danabeeyaha batteriga. Haddii kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya / mashiinka kicinta lagu kaydiyo meel

bannaan oo ay dad badan heli karaan (tusaale, meesha baaskiilada ama maqaasiinka gaadhiyada carruurta ee dhismooyinka dabaqyada ah), markaa waa in kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeyaa la xiraa, haddii ay suurtagal tahayna, lagu xiraa fiilo quful leh/silsilad. La xidhiidh shirkaddaada caymiska si aad u ogaato shuruudaha kaydinta badbaadada leh. Haddii ay lagama maarmaan noqoto in si ku meel gaadh ah loo dhigo kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya bannaanka, waa in lagu xidhaa meel cimiladu adag ka ilaalinayso.

## Taraafikada

- Marka aad wadato kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya/ mashiinka kicinta, waxa kugu waajib ah in aad raacdo sharciyada taraafikada ee khuseeya.
- Waa inaadan ku wadin kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya/ mashiinka kicinta adigoo ku sakhraansan aalkolo, daroogo ama daawooyin saameynaya awoodaada qiimaynta.
- Marka aad dibadda ugu kaxayso kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya xawaare ka dheereeya xawaaraha socodka (qiyaastii 5-6 km saacaddii), sharciyada taraafikada ee baaskiileyda ayaa lagu dhaqmayaa. Kursiga curyaanka ah ee korontada ku shaqeeya waa in loo qalabeeyaa sidii baaskiil ahaan waana in aad ku kaxaysataa jidka baaskiilka haddii uu jiro.
- Marka mugdiga jiro, waa in kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeyaa uu leeyahay nalal iyo kaah celin.
- Haddii aad ku kaxayso kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya/ mashiinka kicinta in ka yar qiyaastii 5-6 km saacadii, waxaa loo tixgelinayaa sidii taraafikada lugeeyaasha oo kale.
- Haddii qof kale uu waxyeeleeyo kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya, tusaale; ku dulmara gaadiid, waa in aad qortaa magaca qofka iyo faahfaahinta xiriirkiisa. La xidhiidh qalab-bixiyahaaga iyo shirkaddaada caymiska. Inta badan, ogeysiis booliiska ah ayaa loo baahan yahay in la sameeyo.

## Dayactirka iyo daryeelka

- Dayactirka iyo farsamada daryeelka waxa kaliya oo fulin kara farsamayaqaannada Xarunta Qalabka Gargaarka.
- Haddii kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya/ mashiinka kicinta uu joojiyo shaqada asigoo maraya bannaanka guriga, waa in la geeyaa meel ammaan ah. Waa inaadan waligaa jiidin kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya/ mashiinka kicinta (ku jiidid gaadhi kale) sababtoo ah tani waxay sababi kartaa khatar dab ah. Haddii aadan adigu diyaarin karin gaadiid, waxaad kiraysan kartaa shirkad xamuul qaadista ah ama shirkadda qaadista gaadiidka. Waa inaad adigu iska bixisaa kharashka gaadiidka.

## Caymis

- Kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya iyo mashiinka kicinta ayaa ah qalab tuugada u nugul. Haddii kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya/ mashiinka kicinta ay dhaawacmaan ama lumaan, waxaa laga yaabaa inay waajib kugu noqota magdhow.
- Iska hubi caymiskaaga. Macluumaad ku saabsan qiimaha kursiga curyaanka ee korontada ku shaqeeya/ mashiinka kicinta waxaa laga heli karaa heshiiska amaahda ama qalab-bixiyaha.

## Marka lagu daro waafajinta baabuurka baahiyaha

Haddii ay taagantahay baahida ah in la waafajiyo baabuurka baahiyaha iyo kursi-curiyaaneedkaaga, waa inaad la xiriirtaa qalab-bixiyahaaga ka hor intaysan bilaabin shaqada waafajinta. Tani waa si uu qalab-bixiyahaaga ula xiriiro Xarunta Qalabka Gargaarka si loo baaro khatarta si wadajir ah.

Beslutad: 2023-01-25 av Ledningsrådet för hjälpmedel